



National Institute for Public Health
and the Environment
Ministry of Health, Welfare and Sport

Gudbinta Cudurka Qaaxada,

nadaafada qufaca iyo sharciyada nolasha



Cudurka qaaxada waxaa lagu kala qaadaa qufac iyo hindhiso. Kor u qaadista nadaafada qufaca waxay kaa caawin kartaa joojinta faafinta cudurka. Inaad si kumeel gaar ah oga dheeraato inaad taabato dadka kale waxay yareyneysaa halista dadka aad ku qaadsiiin karto cudurka. Taasi waa sababta ay muhiim u tahay in la raaco sharciyada dhaqanka ee joogtada ah inta lagu jiro muddada caabuqa. Xaashidaan waxay wax badan kaaga sheegeysaa nadaafada qufaca iyo sharciyada dhaqanka ee joogtada ah ee la xariirta dadka qaba cudurka qaaxada furan.

Gudbinta cudurka

Cudurka qaaxada wuxuu ku faafaa hawada, tusaale ahaan marka qof uu qufaco ama hindhiso. Marka aadqufacdo ama hindhiso, dhibco yaryar ayaa kasoo baxaaya sambabadaada kadibna ku firdhaaya hawada. Haddii bukaanka uu qabo cudurka qaaxada "sambabada furan (oo saameysay sambabada), dhibcahaas waxaa kujira bakteeriyada qaaxada (TB). Qof walba oo ay gaarto bakteeriyadaan wuxuu halis ugu jiraa inuu qaado cudurka. Bakteeriyada qaaxada (TB) waxay gali kartaa dhiiga qofkaas, muddo kadibna, waxay sababi kartaa cudurka qaaxada.

Dadka halista badan ugu jira inay qaadaan cudurka waa dadka aad inta badan isla joogtaan. Dadkaan waxaa kujira dadka aad la nooshahay, qoyska, saaxibadaa iyo asxaabtaada. Bakteeriyada kuma faafi karto taabashada sagxadaha ama dharka. Ama dhunkashada. Haddii qof uu qabo qaaxada (TB), laanta Adeega Caafimaadka Dadwaynaha (GGD) ayaa sidoo kale baarta qofka dadka u dhaw. Waxaad macluumaad dheeraad ah ka heli doontaa xaashida xogta ku saaban cudurka Qaaxada iyo Raadraaca qofka.

Nadaafada qufaca

Daboolida sankaa iyo afkaaga waxay joojinaysaa dhibcaha bakteeriyada qaaxada (TB) inay ku faafaan hawada. Arrintaan waxay hoos u dhigaysaa in dadka kuu dhaw ay u riyaan bakteeriyada. Tani waxaa sidoo kale loo yaqaan nadaafada qufaca. Nadaafada qufaca ee wanaagsan waxaa kujira tallaabooyinkaansoosocda:



- Dadab wajjigaaga marka aad qufacayso ama aad hindhisayso.



- Ku qufaca ama ku hindhis suxulkaaga.
- Isticmaal xaashida la isku tirtiro kadib iska ttuur.

Sharciyada dhaqanka joogtada ah

Inta lagu jiro muddada caabuqu faafaayo waa muhiim inaad badesho ama yareyso xiriirka aad la sameyneyso dadka kale. Inta badan dadka cudurka ma gudbin karaan kadib marka ay qaataan daawada muddo labo asbuuc. Raacida sharciyada dhaqanka ee joogtada ah waxay hoos u dhigaan halista qaadiinta cudurka dadka kale:

1. Inta lagu jiro asbuuca koowaad ee daaweynta, kaliya xiriir dadka gurigaaga kunool. Ma ahan inaad ka dheeraato mana ahan inay kaa dheeraadaan adiga.
2. Ka dheeroow dadka cusub, gaar ahaan carruurta.
3. Ha booqan dad kale.
4. Qof walba oo kusoo booqda ama ku qasban inuu kusoo booqdo waa inuu xirto maaskarada qaaska ah ee wajiga. Kalkaalisada GGD ayaa kuu sharixi doonta sida loo isticmaalo.
5. Waa CAADI banaanka waad kusoo lugeyn kartaa, laakiin iska ilaali gudaha meelaha ay joogaan dadka badan, sida bukhaarada waawayn.
6. Haddii ay jirto sabab degdeg ah oo kugu kaligaysa inaad aado banaanka (tusaale, isbitaalka si aad u aragto dakhtar) waa inaad marka koowaad kala hadasho kalkaalisada GGD. Sababo la xariira halista inay dadka kale qaadaan cudurka.
7. Hubi qolka aad joogto inuu leeyahay hawo iyo iftiin badan.

Maxaan ku sameynaynaa xogtaada?

GGD waxay xogtaada gaarka ah ee ay haysto kuna jira faylka caafimaadka u kaydisaa qaab waafaqsan sharciyada qaanuunka degsan.

Ma qabtaa wax su'aalo, tallooyin, walaacyo ama bogaadin ku saabsan baaritaanka?

- Fadlan la xariir waaxda kahortaga cudurka qaaxada ee GGD ee deegaankaaga. Waxaad xogta xiriirka ka heli kartaa www.ggd.nl iyo kaarka casuumaada talaalka. GGDs waxay leedahay hanaan lasoo gudbiyo cabashooyinka.
- Waxaad xog dheeraad ah oo ku saabsan cudurka qaaxada ka heli kartaa www.rivm.nl/tuberculose.

This information is available in English at:

Xogtaan oo Soomaali ah waxaa laga heli karaa:

Te informacje można znaleźć w języku polskim na stronie:

ብሕንቋ ትግርኛ ዝተተርጎሙ መልክዕ ናይ'ዚ ሓበሬታ፣ ኣብ'ዚ ዝስዕብ ገጽ ክርከብ ይከኣል፡-

هذه المعلومات متاحة باللغة العربية في هذا الموضوع:

این معلومات به زبان دری در اینجا قابل دسترس است:



www.rivm.nl/en/tuberculosis/information-materials

Published by:

**National Institute for Public Health
and the Environment, RIVM**

PO Box 1 | 3720 BA Bilthoven

The Netherlands

www.rivm.nl/en

March 2022

Committed to *health and sustainability*